

Heshiiska waxbarashada

Ma ka bootay dhigashada dugsiga sare? Mise weligaa ba ma bilaabin waxbarashada dugsiga sare? Adigoo kaashanaayo Heshiiska waxbarashada ayaa imminka waxaad heli kartaa fursad aad ku hesho shahaado heer dugsiga sare iwm. Teeda kale, waxaad isku wadi kartaa waxbarashada dugsiga sare iyo shaqo ama tababarka shaqada, adigoo isla markaas shaqaysanaayo oona ku dadaalaayo helida khibrada shaqada.

Waa maxay Heshiiska waxbarashada?

Heshiiska waxbarashada waa heshiis dhexmara adiga, Xafiiska Shaqada iyo maamulka degmadaada. Taasoo lagu heshiiyay in aad dhigan doonto dugsiga dadka waawayn heer dugsiga sare iwm. Teeda kale, waxaad nus wakhti wadan kartaa shaqo ama tababarka shaqada ama barnaamijyada ku salaysan siyaasadda suuqa shaqada.

Ma lay siin karaa Heshiiska waxbarashada?

Waa lagu siin karaa Heshiiska waxbarashada haddii:

- aad Xafiiska Shaqada iska diiwan gelisay
- da'daada u dhaxayso 20–24 sano
- aadan gebi ahaan dhamaysan waxbarashada heer dugsiga sare
- aadan ka qaybgelin qorsheha sal-dhigida
- aad degan tahay degmo maamulkeeda heshiis wada shaqayn la galay Xafiiska Shaqada iyo Dowladda hoose (xitaa haddii sannadka 2015 u jiro qorshe noocaas ah).

Soo gunnad layma siinaayo?

Haddii aad ugu yaraan boqolkiiba 50 waxbarato waxaad Guddiga arrimaha waxbarashada, CSN ka codsan kartaa deqda/deynta waxbarashada (studiemedel). Haddiise shaqo iyo waxbarasho isku dhex wado waxaa mushahar laga siinayaa shaqada. Haddii aad ka qayb gasho tababar shaqo ama barnaamij kale, waxaad xaq ku leedahay Kaalmo-dhaqaaleedka dhaqdhaqaaqa shaqada (aktivitetsstöd) ama Gunnada ka qaybgaleyaasha qorsheha shaqada, kuwaasoo Försäkringskassan ay bixiso.

Ilaa intee mudo ah ayaan Heshiiska waxbarashada haysan karaa?

Heshiiska waxbarashada waxaad haysan kartaa ilaa aad 25 sano ka buuxsato ama aad ka dhamaysato waxbarashada dugsiga sare.

Soo caymis ma lihi?

Waxaad xaq ku leedahay caymis markii aad Heshiiska waxbarashada leedahay. Waa caymis xiriir la leh waxa aad mashquul ku tahay (sida waxbarasho, shaqo ama barnaamij).

Ma layga ciribtiri karaa booskayga?

Haddii aad waxbarashada joojiso waxaa laga ciribtirayaa Heshiiska waxbarashada.

Dib ma u heli karaa Heshiiska waxbarasha kaddib markii layga ciribtiro?

Haddii aad mar kale waxbarashada bilaawdo waxaa suurtagal noqon karo in fursadaas lagu siiyo. Laakinse, heshiis cusub waxaad heli kartaa haddii aad shurudaha buuxiso.

Sidee ba mas'uuliyada loo qaybsaday?

Warbixin dheeraad ku saabsan Heshiiska waxbarashada waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska Shaqada. Gacanhaaye Xafiiska Shaqada ayaa ku qiimayn doono haddii Heshiiska waxbarashada u ku anfacayo iyo in kale.

Nidaamyada

Xeer-maamuleedka (2015:502) xiriir la leh iskudabaridka hawlgallada Xafiiska Shaqada iyo Dowladaha hoose, kuwaasoo ujeedooda ah in hoos loo dhigo shaqo la'aanta dhallinyarada.

Nagala soo xiriir 0771-416 416 haddii arrintaan aad xiisaynayso ama aad doonayso warbixin dheeraad ah. Waxaad kaloo booqan kartaa Xafiiska Shaqada kugu dhow ama shabakadda internetka arbetsformedlingen.se.